

Sidaad u caawin karto

haddii aad garanayso cid la kulantay rabshada qoyska, waad caawin kartaa ayaga.

Waxaad:

- u-sheegi kartaa inaan rabshada qoysku aysan ahayn OK
- u-gudbi macluumaadka ku qoran baroosharkan
- kala hadal adeegyada ay heli karaan, iyo siday ula xiriiri karaan
- ku-taageer oo ku dhiirigeli inaad la xiriirto adeegyadaas.

**Hadday jirto cid la dhaawacay
ama khatar ku jirta, waxaad
ka wacdaa booliiska 111 isla
markiiba.**

Qoraalkan waxaa la sameeyey ayadoo lala tashanayo haweenka ka kala socda bulshooyinka kala duwan uuna la tashaday Office of Ethnic Affairs (www.ethnicaffairs.govt.nz) iyo Ministry of Women's Affairs (www.mwa.govt.nz).

Somali

**Hadalkaaga muuji.
Caawimaad dalbo.
Guri ammaan ah.**

Sida loo caawiyo haweenka ka soo kala jeeda dhaqamada kala duwan iyo qoysaskooda inay ku noolaadaan rabshad la'aan guryahooda.



Adeegyada ka jira New Zealand

Adeegyadan waxay u jiraan inay cid walba caawiyaan – haween, niman iyo carruurba – ayadoo aysan ku xirnayn luqadda ay kuy hadlaan ama dhaqankooda.

Haweenka la kulma rabshada qoyska waxay:

- talooyin ka heli karaan adeegyada dowladda iyo kuwa bulshada kuwaas oo lacag la'aan iyo qarsoodi ah
- heli karaan talooyinka xiriirka guurka
- heli karaan talooyinka socdaalka hadday wax iska baddalaan xaaladda xiriirkooda
- heli karaan caawimaad inay helaan meel ku-meel-gaar ah oo ay ku noolaadaan
- heli karaan ilaalin sharciyeed, ayaga iyo carruurtooda iyo qoysaskooda.

Adeegyada New Zealand waxay u tixgeliyaan kalsoonaanta iyo gaarnimada si daran, lamana qaybsadaan macluumaadka cid kale ayadoon qofka leh uusan ogalaan.

Adeegyadan waxay kaloo adeegsan karaan turyumaanka taleefanka ee xirfad-yaqaanka ah ama turjumaanka weji-ka-wejiga ah.

Rabshada qoyska waa ka sharci-darro New Zealand

Rabshada qoysku waa markii qof si jir ah, caadifad ama galmo ah loo dhaawaco ama ay ugu xadgudubto xubin qoyskooda ah.

Maahan OK in...

- la dhaawaco, dharbaaxo, la feero, la ceejiyo, la laado ama si kaloo jir ah loo dhaawaco
- la handado ama la musuqmaasuqo
- lagu xoogo galmo ama lagu khasbo galmo samayn
- lacagta loo diido, cuntada, hoyga ama dharka
- lagu handado carruur ka-qaadid
- laga maqneeyo ama laga cidleeyo qoyska iyo bulkshadaba
- la xabiso ayagoon doonayn
- flagu qasbo guur. Waxaa kaloo sharci-darro ah haddii ay ka yar yihiin 16 sano jir.

New Zealand waa diimooqaraadi – qof kasta wuxuu leeyahay xuquuq iyo waajibaad

Halkan New Zealand, qof kasta wuxuu leeyahay xaqa inuu xor ka yahay rabshad

Taas macnaheedu waa in haweenka New Zealand oo dhan ay leeyihiin xaqa ah:

- inay ka tagaan xiriirka guurka rabshadda leh
- inay siiyaan carruurtooda beya'd guri ammaan ah
- inah dhahaan 'maya' haddii aysan doonayn inay wax sameeyaan
- inay shaqeeyaan*
- inay waxbartaan.*

Haweenku waa inaysan ka tegin nimankooda ama wdaygooda ka hor intaysan helin caawimaad.

Adeegyada Dowladda iyo Bulshada waxay arimha kalsoonida iyo gaarnimada ka dhigaan kuwo daran

* ayadoo ku xiran xaaladooda socdaal iyo muwaadinimo